

- Awoodsiinta Qoyska
- Luuqadda Ingiriisiga oo Luuqadda Labaad ah (English as a Second Language, ESL)
- Shaqada iyo tabobarka shaqo
- Guryaynta iyo kahortagga guryo la'aanta
- Wax-ka-qabadka tacadiga guriga dhaxdiisa iyo taageerada dadka ka badbaaday tahriibinta iyo tacadiga galmada

- Caafimaadka habdhaqanka liisan ku haysta
- Qaadashada dhalashada iyo adeegyada sharciga
- Nafaqada iyo badqabka dadka waawayn
- Xarumaha Waxbarashada Hore (waxaana lagala shaqeeyaa Barnaamijka Waxbarashada Xannaanada ee Seattle)
- Barnaamijyada Dhalinyarta (K-12 iyo dugsiya sare kadib)



Xafiisyadeena iyo goobaha barnaamijyadu waxay ku baahsan yihiin Degmada King si aanu ugu shaqayno macaamiisheena halka ay deggan yihiin iyo halka ay ka shaqeeyaan. 2019, Xafiiskeena Guud waxa uu dhammaystiray olole maaliyadeed oo ku dhawaad libilaabtay qorshaheeni hore, taas oo abuurtay bulshadu hool ay iskugu timaado, xarun khayraadka dhalinyarta ah, fasalo dheeraad ah, iyo 40 jago oo cusub oo Xarunta Waxbarashada Hore ah. Waxaanu sidoo kale furnay Xarun Waxbarashada Hore ah oo cusub oo ku taal Lake City.

**Xafiiska Guud**

4008 Martin Luther King, Jr. Way S.  
Seattle, WA 98108  
Taleefan: (206) 721-0243  
Faakis: (206) 721-0282  
TTY: (206) 721-5299

**Xafiiska Tacadiga Guriga Dhaxdiisa**

PO Box 14373  
Seattle, WA 98114  
Taleefan: (206) 721-0243  
Faakis: (206) 721-3967

**Saacadaha Fasaxa**

Khadadka Mushkiladda  
(5 galabnimo – 9 subaxnimo):  
Amxaari / Tigringa: (206) 495-5256  
Ruush: (206) 954-2903  
Soomaali: (206) 310-5841  
Fiitnaam: (206) 351-8809

**Beacon Hill Early Learning Center**

6230 Beacon Avenue South  
Seattle, WA 98108  
Taleefan: (206) 723-3304

**Kent Office**

124 4th Avenue South, Suite 270  
Kent, WA 98032  
Taleefan: (253) 859-6197

**Behavioral Health SeaTac Office**


4800 S. 188th St., Suite 240  
SeaTac, WA 98188  
Taleefan: (253) 204-4705

**Xafiiska SeaTac**

4800 S. 188th St., Suite 240  
SeaTac, WA 98188  
Taleefan: (206) 957-2029

**Lake City Early Learning Center**

2828 NE 127th St.  
Seattle, WA 98125  
(206) 743-8559



[www.rewa.org](http://www.rewa.org)

Fadlan nagala soco baraha bulshada!



**Refugee Women's Alliance**

Awoodsiinta qoysaska • Awoodsiinta bulshooyinka



[www.rewa.org](http://www.rewa.org)



## Macluumaadka ReWA

Iskaashatada Dumarka Qaxootiga ah (ReWA)—urur qaran ahaan la aqoonsan yahay, qoomiyado badan ka kooban, oo samofal—oo u ololaysa wada jirka, madaxbanaanida, hoggaanka shakhsi ahaaneed, iyo bulsho xooggan iyada oo siisa dumarka qaxootiga iyo soo galaystiga ah iyo qoysaskooda adeegyo dhaqan iyo luuqad ahaanba ku munaasab ah. ReWA waxay u ololaysaa sinnaanta bulshada, siyaasadaha dadwaynaha, iyo helitaanka loo siman yahay ee adeegyada iyada oo la qaddarinayo qiyamka dhaqameed iyo xuquuqda isku-tashiga.

1985, koox dumar qaxooti ah oo si wanaagsan u degay ayaa doonay meesha bannaan inay buuxiyaan dumar markaa yimid iyada oo siisay adeegyada baahiyahooda gaarka ah iyada oo lagula hadlayo luuqadahooda gaarka ah. Iminka waa mid kamid ah adeeg-bixiyayaasha adeegyada qaxootiga iyo dadka soo galaytiga ah ee ugu waawayn aagga Puget Sound, ReWA waxay ka caawisaa kumanaan qoys sanad kasta inay sameeyaan kala-guur wax-ku-ool ah oo ay isku-illaansho ku gaadhaan, una noqdaan xubno wax ku soo kordhiya bulshadeena.

ReWA waxa uu u shaqeeyaa wax ka badan 11,000 oo qaxooti ah iyo dadka soo galaystiga ah sanadkii:

- 10 barnaamij oo dhaqanka ku munaasab ah ayaa siiya adeegyada fidxan macaamiisheena oo ay badanaa soo xigtaan oo ay ku celiyaan hay'adaha kale ee bulshada ku salaysan.
- 140+ shaqaale ayaa matala oo ah xubnaha bulshada aanu u adeegno.
- Wax ka badan 85% shaqaalaheena iyo 2/3 guddideenu waa soo galayti, qaxooti, ama dadka aan caddaanka ahayn.
- Waxaa lagu hadlaa wax ka badan 50 luuqadood iyo lahjaddood—**ta ugu badan hay'adaha oo dhan Degmada King.**

Soomaali Oromo Amxaari Barmiiis  
Nebaali Tigringa Sawaaxili Mandarin  
Fiitmaaniis Tagalog Farsi Urdu

## Taageer Shaqadeena



ReWA waxay leedahay deeqo badan oo ay kamid yihiin hay'adaha dawladda, Untited Way, hay'ado, iyo shirkado waawayn, laakiin shaqadeenu suurto gal ma noqonayso haddii ayna jirin deeqaha xubnaha bulshada sidaada oo kale.

**Deeq-bixiyayaasha shakhsiyadka ah** kuwaas oo si toos ah ugu deeqa ReWA waxay na siisaa inaanu si dabacsan uga jawaabno baahiyaha macmiisheena marka la arko baahiyaha. Deeq-bixiyayaasha waxaa wixii soo kordha lala socodsiiyaa sanadka oo dhan waxaana lagu soo casuumaa munaasabadaha gaarka ah. Iyadoo loo marayo ololaha baraha bulshada iyo barnaamijka iswaafajinta shaqaalaha iyo shaqada, deeq-bixiyayaashayadu waxay laba jibbaar in ka badan kordhiyaan deeqdoodii iyaga oo wax ka ogaada shaqada aanu hayno. Si aad macluumaad dheeraad ah u hesho, fadlan booqo [www.rewa.org/get-involved](http://www.rewa.org/get-involved).



Dadka wakhtiga ku deeqaa waxay naga caawiyaan Maalinta Muwaadinimada

“ReWA darteed, waxaan wadi karaa gaadhi, waxaan haystaa shaqo iyo guri, waxaanu wiilkaygu ku jiraa dugsiga sare.”

—“Nour,” Macmiil ReWA oo ka timid Soomaaliya

**Dadka wakhtigooda ku deeqay iyo shaqaalaha tabobarka ku jira** ayaa wakhtigooda iyo khayraadkooda ku deeqa taasi oo naga caawisa inaanu taageerno jaarkeena cusub. Dadkayaga wakhtigooda ku deeqay caadiyan waxaa weeye 18 sano jir kuwa ka waawayn oo waxay saacad toddobaadkii muddo saddex bilood ah ugu deeqaan hal aag barnaamij ama munaasabad. Waxay bixiyaan xirfadaha barista, aqoonta dhaqameed, helitaanka adeegyada bulshada aagga, iyo maamulidda kiiska. Si aad wakhtigaaga ugu deeqdo ama tabobar shaqo aad ugu qaadato, fadlan iimeel u dir [volunteers@rewa.org](mailto:volunteers@rewa.org).

Dadaalkeena **ololaha iyo wacyi gelinta** waxaa kamid ah Maalinta Sharcidejinta sanadkii, markaa oo macaamiisha iyo shaqaalaha ay kala hadlayaan baahiyaha bulshada sharcidejiyayaasha deegaanka iyo gobolka. Waxaanu sidoo kale qabanaa wacyi gelin iyo dabbaaldag munaadabo ah oo Maalinta Dumarka Caalamka iyo Maalinta Qaxootiga Adduunka ku saabsan oo waxaanu qabanaa waxbarashada iyo gaadhitaan dadka codaynaya si aanu u xoojino macaamiisheena si ay u sheegaan tabashooyinkooda.

Si aad u kafaale qaado ama aad uga qaybgasho dhacdooyin, fadlan iimeel u dir [development@rewa.org](mailto:development@rewa.org).



ReWA waxay kaqaybqaadataa Socodka Dumarka

Dhalinyarta waxay wax ka baranayaan cadaaladda deegaanka

